



AKADEMISKA
SJUKHUSET

Tillmatning av barn vid diabetes hos modern - Somaliska

Quudinta kaabidda ah ee carruurta leh hooyooyinka sonkorta qaba

Macluumaadka



Hadaad wax su'aal ah qabto, laxiriir:

Nagala soo xiriir adeegyada qadka www.1177.se

Qaybta hooyada oo khaas ah

018-611 57 43



Rog bogga si aad
u sii waddo
akhriska!

REGION UPPSALA

Quudinta kaabidda ah ee carruurta leh hooyooyinka sonkorta qaba

Haddii sonkorow lagaa daweeyo, canugaaga dhawaan dhashay wuxuu u baahan doonaa quudin kaabid ah oo joogto ah. Ilmuhu waxa laga yaabaa inay korortay wax soo saarka insulinta laga bilaabo wakhtiga uurjiifidda, kaas oo dhalmada ka dib keeni karta in sonkorta dhiigga hoos u dhacdo.

Daraasaduhu waxay muujiyeen inay badqab tahay in haweenka uurka leh ee qaba xanuunka sonkorta inay caanaha soo saaraan toddobaadka 36+0 oo ay kaydiyaan caanahaas si ay u siiyaan ilmahooda hadda dhashay si ay u kabaan. Waxay muujiyeen in aanay kordhinayn halista foosha dhicisowga ama ay khatar sare u keeneyn isbitaal dhigid dhallaanka cusub.

Ka ahaan Akademiska sjukhuset, waxaanu kugula talinaynaa adiga oo si caafimaad leh u daweeynaya xanuunka sonkorta oo uur leh, inaad godliso naasahaaga laga bilaabo usbuuca 36+0 ilaa 2 jeer maalintii ugu badnaan 10 daqiiqo. Dumarka oo dhan kuma keenaan caano gacan godlinta laakiin haddii aad ka mid tahay kuwaaas, waxaan kugula talineynaa inaad ku ururiso caanaha, tusaale ahaan qaaddo, oo ku shub weelal nadiif ah oo lagu ururiyo, taariikh ku shandadee oo qabooji. Tusaalaha weelka lagu ururiyo: bacda yar ee qaboojisada ah. Ka dib dambarkaaga ku soo qaad bacda qaboojisada ah oo leh baakado baraf ah qaybta hooyada si aad ugu isticmaasho dambarkaaga kaab ahaan ilmahaaga. Waxaa laga yaabaa inaad ku kabto caanaha gasacadda haddii aysan jirin dambar ku filan ama haddii ilmuhu uu u hooseeyo sonkorta dhiigga. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la hadal umulisoooyinka xanuunka sonkorta ee jooga qaybta hooyada ee takhasuska leh.

Macluumaadka ku saabsan gacan kulisidda:

Hoos ka daawo filimka 1177:

<https://www.1177.se/Uppsala-lan/Tema/Barn-och-foraldrar/Mat-somn-och-praktiska-rad/Amning-och-modersmjolkstersattning/Mjolka-och-pumpa-ur-brostmjolka/#>

Tilmaamaha:

1. Dhowr daqiiqo ka hor godlinta naaska, si khafiif ah ugu garaac naaska laabta oo kadibna u jiid banaanka dhanka ibta.
2. Ku samee "C" farahaaga meel ka baxsan cidhifyada wareega ibta.
3. U qabo "C"-samaysanka gadaal dhanka laabta, ka dibna farahaaga isku cadaadi oo u jiid dhanka ibta naaska.
4. Ku sii wad ku celcelinta tillaabada 3 si qaafiyad leh adigoo gacanta dabcinaya.



1177

Waxaad ka heli doontaa macluumaadka iyo adeegyada ku saabsan caafimaadkaaga iyo daryeelkaaga bogga 1177.se. Wixii talo ah ee daryeelka caafimaadka, waxaad wici kartaa 1177 24 saac maalintii.



laxiriirAkademiska

Waxaad kala xiriiri kartaa Akademiska Sjukhuset iimaylka: patientkontakt@akademiska.se xiriirka Bukaanka 018-611 30 33, Switchboardka: 018-611 00 00 www.akademiska.se